

XEERKA RUNTA (TRUTH ACT) Kulanka Bulshada

ABRIIL 22, 2025

SHAYGA AJENDAHA AH #14

Shuruucda Muhiimka ah ee Socdaalka la Xiriira

- Xeerka AAMINAADA (TRUST Act), Sharciga Baarlamaanka ee 4 (Cutubka 570, Qodobada 2013), kaasoo xadidaya marxaladaha hay'adaha sharciga guduhu ku xiri karaan shakhsiga ayaga oo wakiil ka ah hay'adaha socdaalka federaalka.
- TRUTH Act, Sharciga Baarlamaanka ee 2792 (Cutubka 768, Qodobada 2016), kaasoo hubinaya hufnaanta iyo korjoogtaynta ku saabsan xiriirka hay'adaha sharciga ee guduhu la leeyhiin saraakiisha socdaalka federaalka.
- Xeerka QIYAMKA (VALUES Act), Sharciga Sanatarka ee 54 (cutubka 495, Qodobada 2017), kaasoo xadidaaya marxaladaha hay'adaha sharciga guduhu u isticmaali karaan dhaqaale ama dad si ay u caawiyaan hay'adaha socdaalka ugana hortagaan in saraakiisha booliska iyo kuxigeenada booliska gobolku qofka weydiiyaan xaaladiisa soogalootinimada, la wadaagista macluumaadka gaarka ah ee shakhsiga hay'adaha socdaalka, in sharcigu ogolyahay ama waajibinayo maahane, ama in qofka la iska xiro ayada oo loo sababaynayo kaliya inuu ku dhacay amar tarxiil ah ama inta badan xadgudubyada kale ee socdaalka.

Kaalinta Booliska Gobolka San Diego ku leeyahay Sharciga Socdaalka

MA SAMEEYAAN inay weydiiyaan xaalada socdaalka

MA SAMEEYAAN baar ama dhaqangali sharciga socdaalka

MA SAMEEYAAN xirista qofka codsiga ICE dartiis

MA SAMEEYAAN ka qaybqaadashada hawlgalada hay'adaha socdaalka, baaritaanada wadooyinka, ama tarxiilka dadka faraha badan

MA SAMEEYAAN inay bixiyaan macluumaadka shakhsiga, ee ku saabsan qofka, oo ay ku jiraan, walow aysan ku koobnayn, ciwaanka guriga qofka, ama shaqada in macluumaadkaasu mid caam ah yahay maahane

SAMEEYAAN la wadaagista ICE macluumaadka taariikhda sii daynta ama wareejinta marka qofka lagu xukumo danbi u qalma (qof horey ugu xirnaa xabsiga Degmada San Diego) ama in haddii uu fasaxayo waaranka qaadiga ku shaqada leh

SAMEEYAAN inay ka qaybqaataan guddi hawleedka gobolka oo ay dhaqangaliyaan sharciga gobolka iyo kan federaalka ee la xiriira daroogada, hawlaha faldanbiyeedyada ah ee wadanka iskaga gudba, safrinta dadka, hubka, argagaxisonimada iyo falalka kala ee danbiyada ah ee dhibaatda wata ee aysan diirada saarin hay'adaha socdaalku

Oggolaansho Siidayn ah si waafaqsan SB 54 (Koodhka Dawlada 7282.5)

Qofka la xiray wuxuu xaq u leeyahay haddii uu yahay:

- Lagu xukumay danbi culus ama dhibatao ah; ama
- Lagu xukumay danbi ciqaabtiisu gaarsiisan tahay in lagu xiro xabsiga gobolka: ama
- Lagu xukumay 5 tii sanno ee lasoo dhaafay danbi fudud oo ah faldanbiyeed ciqaabtiisu gaarsiisan tahay danbi fudud ama danbi culus; ama
- Lagu xukumay danbiyo gaar ah 15 kii sanno ee lasoo dhaafay kuwaas oo ahaa danbiyo waaweyn; ama
- Uu hadda ka diiwaangashan yahay Diiwaanka Galmada iyo Waxyeelada ee California; ama
- Lagu xukumay danbi federaal ah kaasoo buuxinaya qeexitaanka danbi abaabulan; ama
- Hadda wajahaya eedaymo ku saabsan danbi loo arko mid culus ama danbi xadgudub ah ama ciqaabtiisu garasiisan tahay xabsi muddo ah oo heer gobol ah ayada oo xaakimku uu hayo natijada cadaynaha sababta; ama

Waaranka Qaadigu baab'iyo sharciga gobolka.

QAABKA HANAANKA XABSIGU U SOCONAYO

ICE INAY KU WAREYSATO/KULA HADASHO SHAKHSIGA XABSIGA BOOLISKA GOBOLKA

TALAABADA SDSO

SDSO waxay baaraysaa codsiyada go'aaminta haddii qofku buuxiyo u qalmitaanka dacwadda.

- › Haddii uusan soo buuxin shuruuda, hanaanku wuu dhamaanayaa, qofkuna wuxuu heli doonaa koobiga foomka xogtiisa.
- › Haddii uu buuxiyo shuruuda, SDSO waxay siinaysaa foomka aqbalaada wareysiga ICE qofka (J-330 form).
 - Haddi qofku buuxiyo shuruuda, kadib:
 - Qofka xiran waxaa la siinayaa foomka ogolaanshaha (wuxuu ku helayaa luuqad uu doonaayo), wuxuuna go'aan ka gaarayaa haddii uu doonayo in:
 - Uu diido codsiga wareysiga; ama
 - Ogolaanayaa codsiga wareysiga; ama
 - Wuxuu ogolaanayaa asaga oo uu la joogo qareenkiisu

QAABKA HANAANKA XABSIGU U SOCONAYO

ICE WAXAY DOONAYSAA INAY HESHO OGAYSIISKA TAARIIKHDA SIIDAYNTA
QOFKA U XIRAN BOOLISKA GOBOLKA

Talaabada SDSO (haddii taariikhda siidaynta la heli karo)

SDSO waxay baaraysaa codsiyada go'aaminta haddii qofku buuxiyo u qalmitaanka dacwadda.

- Haddii uusan buuxin shuruuda, hanaanku waa dhamaanayaa.
- Haddii qofku buuxiyo shuruuda, taariikhda lasiidaynayana la helayo, kaddib:
 - Qofka xiran wuxuu helayaa foomka J-335 (uu ku helayo luuqada uu rabo), kaasoo ogaysiinaya in ICE lala xiriiri doono maalintaas la sii daynayo.

Wicitaanka ujeedadiisu waa ogaysiis oo kaliya. Lama jadwalaynayno iskulamana dubaridayno siidaynta qofka anaga iyo ICE, dibna looma dhigayo siidaynta ayada oo qayb ka ah hanaankan.

QAABKA HANAANKA XABSIGU U SOCONAYO


**ICE WAXAY DOONAYSAA INAY HESHO OGAYSIISKA TAARIIKHDA SIIDAYNTA
QOFKA U XIRAN BOOLISKA GOBOLKA**

Talaabada SDSO (haddii taariikhda siidaynta aan la aqoon/la heli karin)

**SDSO waxay baaraysaa codsiyada go'aaminta haddii qofku buuxiyo u qalmitaanka
dacwadda.**

- **Haddii uusan buuxin shuruuda, hanaanku waa dhamaanayaa.**
- **Haddii qofku buuxiyo shuruuda, taariikhda lasiidaynayana aan la hayn, kaddib:**
 - **Qofka xiran waxaa la siinayaa foomka J-340 (lagu heli karo luuqada la rabo), kaasoo ogaysiinaya in ICE danaynayso taariikhda la sii daynayo lana ogaysiin doono marka taariikhdaasu diyaar noqoto.**

CODSIYADA ICE EE SANADIHII LASOO DHAAFAY



CODSIYADA WAREYSIGA ICE 2024



WAREYSIYADA
LA CODSADAY

1*



AQBALAY
WAREYSIGA

0



SHAKHSIGA DIIDAY
WAREYSIGA

1*



AQBALAY
WAREYSIGA AYADA
OO QAREEN JOOGO

0


* Cilad soo gudbinta ah – majiraan wareysiyo dhacay.

OGAYSIINTA ICE SIIDAYNT EE 2024


1,236 Codsiyada Shaacinta
Ogeysiiska ee la helay lana
Baaray ee ICE

BISHA	CODSIYADA LA DIIDAY	CODSIYADA LA AQBALAY
Janaayo	12	88
Febraayo	19	78
Maarso	12	82
Abriil	19	92
Maajo	20	81
Juun	18	73
Luulyo	19	101
Ogoosto	18	103
Sebteembar	19	95
Oktoobar	22	78
Nofeembar	11	73
Diisambar	13	90
WADARTA GUUD	202	1,034

WAREEJINTA ICE INTII SANNADO AH




WARBIXINTA WAREEJINTA ICE EE 2024



WARBIXINTA WAREEJINTA ICE EE 2024


Isa soo sheegay Wadanka uu kasoo jeedo	
3	Guatemala
1	Honduras
20	Mexico
1	Thailand
5	MARAYKA NKA



WARBIXINTA WAREEJINTA ICE EE 2024

Xukunada u Qalma	
Gaadiidka ama iibka daroogada khatarta ah ee la manuucay	Khayaanidda Sarkaalka ayada oo gaariga loo Ka xaynayso qaab Khalad ah iyadoo aan la xeerinayn Badqabka
Dhaca – xatooyada khasabka ah ama cabsida ah	Haysashada hubka ee qofka laga mamnuucay
DUI – wadista gaariga qofka oo cabsan khamri ama daroogo kahor (4+ kahor)	Xatooyo Balaaran – qiime ahaan \$950 ka badan
DUI – wadista gaariga qofka oo cabsan khamri ama daroogo waxay sababaysaa dhaawac jirka ah oo soo gaara qof kale	Tuuganimada Guryaha iyo Ganacsiga – Galaya Go'aanka in la Galo fa Xatooyo ama Danbi kasta
DUI – wadista gaariga ayada oo qofku cabsan yahay khamri ama daroogo gaaraysa 0.08% ama ka bada BAC waxay sababaysaa waxyeelo jirka ah oo soo gaarta qof kale	Helitaanka hanti la xaday >\$950
Xukun xabsi oo Been ah	Handadaad ama Xadgudub ku Aadan Sarkaal Nabadeed oo Waajibaad Kujira
In qofku qof kale xadgudub ugu gaysto hub ama qalab khatar badan oo aan ahayn qori	Waaan Federaal ah
In qofku qofka kale xadgudub ugu gaysto xoog nooc kasta oo uu yahay kaasoo ku keeni kara waxyeelo jireed oo weyn	Khayaanidda Sarkaalka ayada oo gaariga loo Ka xaynayso qaab Khalad ah iyadoo aan la xeerinayn Badqabka

30



108

Wareejinada

La
sameeyay

Balamaha*

7dii Sanno ee Ugu danbaysay

*Shakhsiyaadku waxay u dhexeeyeen 1-12 balamaha kahor. Qiyaastii, laba kamid ah sadexdii balamood waxay ahaayeen kuwo heerka danbiyada waaweyn ah sida xadgudub, dhaca guryaha, boobka, xatooyada gawaarida, xadgudubka qoyska, DUI-yo badan, iibinta daroogada, xadgudubyada kormeerada, iwm.

XEERKA RUNTA **(TRUTH ACT)** **Kulanka Bulshada**

ABRIIL 22, 2025

SHAYGA AJENDAHA AH #14